# SDOT waxa bilaabeysaa qabashada codsiyada dadka aadaya daaweyn naf lagu badbaadinayo si ay u maraan Buundada Spokane St Swing Bridge inta Buundada Galbeedka Seattle dhismuhu ku socdo

*Maqaayadaha iyo dukaamada la rafaadsan muddadan lagu jiro cudurka baahsan, shaqaalaha caafimaadka ee dalabka wicitaanka ku shaqeeya, darawallada leysinka heysta ee baabuurta raacitaankooda la wadaago waxey codsan karaan bishan. Qof kasta oo loo oggolaado wuxuu isticmaalayaa Buundada Spokane St Swing Bridge dhamaadka toddobaadka ilaa 8 subax*

SEATTLE – Dadka raadinaya daawo daryeel caafimaad nolol lagu badbaadinayo, shaqaalaha caafimaad wicitaanka ku shaqeeya, maqaayadaha Galbeedka Seattle iyo ganacsatada tafaariiqda, iyo dadka isticmaala baabuurta la wada raaco ee ay leysinka ku bixisay Waaxda Leysinnada (DOL) waxey dhowaan awoodi karaan iney ka codsadaan Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) dul marista buundada hoose ee Spokane St Swing Bridge (low bridge).

Maritaankan waa mid ku meel gaar ah oo xaddidnaan ku saleysan. Dadku waa iney codsadaan, keenaan taargada gaarigooda, waana in SDOT oggolaataa ka hor isticmaalka buundada hoose.

SDOT waxey sidoo kale baddaleysaa saacadaha buundada hoose ay adag tahay in la maro si ay fursad badan ugu oggolaato qof kasta in la maro dhammaadka toddobaadyada. Buundada hoose imika waxey ka xiran tahay baabuurta aan loo oggoleen ka bilaabata 5ta subax ilaa 9ka fiidkii maalin kasta. Laga bilaabo Sabtida, Abriil 10, buundada hoose waxey u sii furnaan doontaa qof kasta ilaa 8da subax dhamaadka toddobaadyada. Adkeynta maalmaha toddobaadka waxey sii ahaan doonaan sidii hore.

Markii la xiray Buundadii Sare-kacsaneyd ee Galbeedka Seattle (high bridge) Maarso 2020, SDOT waxey adkeysay maritaanka buundada hoose si looga hortago in baabuurtu madaxa is gashato siiba dhinaca baabuurtu ku leexato. Isticmaalka maalinta buundada hoose waa la adkeeyey si loo hubiyo in xamuulka, basaska, iyo gaadiidka gurmadka deg-degga ah iney si mug leh ku aadi ama kaga iman karaan Galbeedka Seattle.

Warar dheeraad ah, oo ay ku jiraan liiska buuxa ee baabuurta u qalmi kara maritaanka, waxa laga heli karaa bogga webseydka buundada hoose. Gaadiidka gurmadka deg-degga, basaska iyo, gawaarida xamuulka ma u baahna iney usoo gudbiyaan leysinka taargooyinka SDOT.

**Kooxaha cusub ee u qalma usii oggolaanshaha maritaanka buundada hoose laga bilaabo Juun 1:**

- Dadka deggan Galbeedka Seattle ee u socda ama ka imanaya daaweyn caafimaad nolol lagu badbaadinayo (oggolaansho dhaqkhtarkaaga caafimaadka ayaa loo baahan yahay; foomka wuxuu diyaar ku yahay bogga marista buundada hoose)
- Shaqaalaha caafimaadka ee wicitaanka ku shaqeeya (u socda ama ka imanaya wicitaan shaqo oo kaliya)

- Dhammaan maqaayadaha iyo ganacsatada tafaariiqda (ku kooban socdaallo degdeg ah oo soo qaadasho qalab ama badeeco)
- Baabuurta la wada raaco (waa iney lahaadaan leysinka taargada wada raacidda), kuwaasi oo ay ku jiraan faananka la isla raaco iyo basaska shaqaalaha

**Kooxaha hadda jira waxey u qalmaan iney sii isticmaali karaan marinka:**

- Socdaallada xubnaha International Longshore iyo Warehouse Union Local 19 marka laga diro SODO Union Hall oo ay tagayaan dhinaca galbeed ee buundada hoose
- Ganacsiyada xeebaha iyo warshadaha qiyaastooda buundada hoose (waxey ku kooban tahay socdaallada deg-degga ah si ay usoo qaadaan qalab ama alaabo ama iney wadaan shaqaale muhiim ah)
- Gaadiidka dowladda (waxey ku xadidan yihiin socdaallada deg-degga/ama aan la sii qorsheynin oo ay ku jiraan City of Seattle, King County, State of Washington, gaadiidka magaalada ee ciidamada sharciga xoojiya, iyo dowladda)

Ilaa Abriil 23, SDOT waxey kula wadaageysaa foomamka codsiga onleen shaqaalaha caafimaadka, ganacsatada, iyo baabuurta la isla raaco iney weydiistaan marista buundada hoose. Foomamka codsiga ee dadka u socdaalaya daaweyn caafimaad naf lagu badbaadinayo waxad maanta ka heli kartaa onleen. Dadka darawallada ah waa iney diiwaan geliyaan leysinka taargooyinkooda si ay u helaan oggolaanshaha SDOT ka hor isticmaalidda buundada hoose. Baabuurta aan oggolaanshaha heysan waxey heli doonaan $75 doolar oo ganaax ah socod kasta oo lagu dul maro buundada hoose waqtiga maalintii. Codsiyada waxa looga shaqeynayaa sida ay usoo kala horreeyaan.

**Saacadaha cusub ee dhamaadka todobaadka waxey bilaabanayaan Sabti, Abriil 10**

SDOT waxey beddeleysaa saacadaha la adkeeyey si qof kasta loogu oggolaado inuu isticmaalo buundada ilaa 8 subax maalmaha ugu dambeeya toddobaadka oo kaliya. SDOT waxey dib u eegis ku sameysay macluumaadka ugu dambeeyey ee socodka baabuurta iyo tirada ugu hooseyn karta waqtiyadaasi si loogu oggolaado maritaan dheeraad ah buundada. Isbeddelkan wuxuu dhaqan galayaa dhamaadka toddobaadkan, Sabti Abriil 10 iyo Axad, Abriil 11.

Xusuusin ahaan, buundada hoose waxey ka xiran tahay baabuurta aan oggolaanshaha heysan laga bilaabo **5ta subax ilaa 9ka fiidkii maalmaha toddobaadka, iyo 8da subax ilaa 9ka fiidkii toddobaadka dhammaadkiisa:**

- Maya gaari qof leeyahay (baabuur, faanka yar, raacista la wadaago, iwm.)
- Maya mooto labo lugood ama saddaxley
- Maya taksi iyo baabuurta aabka lagu raaco, sida Uber iyo Lyft

## Siyaasadda maritaanka buundada hoose

Hadafka SDOT wuxuu mar kasta ahaa inuu hubiyo in marin lagu kalsoon yahay u helaan gawaarida emerjensiga, xamuulka, iyo basaska buundada hoose. Intii ay bilaabatay sharci xoojinta ootomaatigga ah horraantii 2021, SDOT waxey isha ku heysay tirada socodka ee buundada hoose waxanuna si adag u fiirinnay Siyaasadda marista buundada hoose, ogaannay hadafyada iyo ujeeddooyinka, waanuna sii wadi doonnaa inaan dib u eegis ku sameyno siyaasadda iyadoo xaaladuhu is-beddelayaan.

Caafimaadka, nolosha, iyo ammaanka waxey ahaayeen kuwa ugu horreeya sannadkii la soo dhaafay waxeyna SDOT mudnaanta siineysaa socdaallada waxa u taraya bukaannada iyo iney marin u helaan daaweyn caafimaad oo lagu badbaadinayo nolol. SDOT waxey sii wadi doontaa iney muhimadda siiso dhaqdhaqaaqa baabuurta emerjensiga ah iyo baabuurta dowladda ee ka jawaabaya xaalado degdeg ah.

COVID-19 iyo xiritaanka Buundada Galbeedka Seattle waxey saameeyeen dhammaan dadka iyo ganacsiyada ku nool Galbeedka Seattle. SDOT waxey diiradda saareysa bixin marin maqaayadaha iyo ganacsiyada tafaariiqda ah oo ku saleysan arrimo xoogaa ah. Qeybahaasi waxa si aan isu dheelli tirneyn u saameeyey COVID-19. Dadaallo adeegsi xiriir joogto ah darteed, magaalada waxey sidoo kale dhageysaneysa sida xiritaanka buundada oo uu la socdo COVID-19 ay u wax yeeshay ganacsiyada, gaar ahaan alaabaha loo soo rarayo.

Inta badan ku safarka buundada hoose (marka laga reebo baabuurta emerjensiga ah, xamuulka culus, iyo basaska) waa shardi socodkuna wuxuu diiradda saarayaa (tirada socdaallada ee la oggol yahay bishiiba) oo wax iska beddel isticmaalkeeda lagu sameyn doono. SDOT waxey adkeyn kartaa ama la noqon kartaa oggolaanshaha marista xilli kasta. SDOT waxey hore ugu sii wargelin doontaa dadka haddii arrintu sidani noqoto. SDOT waxey yareyn doontaa ama kala noqon doontaa maritaanka buundada hoose kooxo badan aakhirka 2021 ka hor inta Terminaalka 5 ee Dekedda Seattle dib u furmin si buundada mug ugu lahaato kororka socodka baabuurta xamuulka sida. Buundada-sare-Kacsan waxa la filayaa iney dib u furanto bartamaha 2022-ka.